

Deeqahu waxay taageeri doonaan sinaanta bulshada iyo la dagaalanka isir nacaybka

Sebtambar 29, 2022

Alberta waxay bilaabaysaa barnaamij cusub oo deeq ah si sare loogu qaado wacyiga dhaqanka loogana caawiyo dadka reer Alberta inay xal u helaan isir nacaybka.

Barnaamijka Deeqda ee Dhaqannada badan iyo La dagaalanka Isir Nacaybka ayaa ku maal gelinaaya lacag dhan \$1 milyan ururada bulshada si ay u bauuraan mashaariic loogu dabaaldago isku dhafnaanta dadka reer Alberta kuna dhiiri gelinaaya dadka ree Alberta in ay ka fakaraan kana hadlaan dedaallada la dagaanka isir nacaybka.

Codsiyada la aqbaloo ayaa taageeri doona mashaariicda sare u qaadaaya fahamka dhaqannada kala duwan ee dhammaan dadka ree Alberta, muujinaaya caqabadaha ay waajahayaan dadka loo gaysto isir nacaybka iyo/ama gacan ka siinaaya dhammaan reer Alberta inay si fiican u fahmaan ayna talaabo ka qaadaan isir nacaybka. Kooxaha bulshadu waxa ay u qalmaan in ay helaan lacag dhan ilaa \$30,000 si ay gacan uga gaystaan hindiseyaashaan.

Codsiyada waxaa la qaban doonaa ilaa Nofambar 16keeda waxayna u furan yihiin ururada khayriga ah ee fadhigoodu yahay Alberta, ayna ku jiraan ururada dhaqannada kala duwan iyo diimaha ku salaysan, Deegaannada First Nation iyo Metis.

Marka ay bilowdo barnaamijkaan deeqda ah, dawlada Alberta ayaa sii wadaysa in ay wax ka qabato arimaha dhaqannada oo dhan iyo la dagaalanka isir nacaybka ayadoo u fududaynaysa bulshooyinka dhaqanka inay khibradooda wadaagaan soona bandhigaysa hormarka ay ku soo kordhiyeen Alberta.

Barnaamijka gobalka ee [Qorshaha Talaabada Ka dhanka ah Isir Nacaybka](#) waa tubta lagu gaaraayo talaabo macno leh wuxuuna tilmaamayaa dedaalka dawladu gelinayso isku dhafnaanta bulshada. Waxaa ku jira barnaamijka dhawaan la furay ee [Abaal marinnada](#)

[Aqoonsiga Soo galootiga cusub ee Alberta](#) si loogu dabaal dego guulaha dadka soo galootiga ah, ayadoo lagu dhawaaqi doona dadka guulaystay Sebtembar 21keeda, iyo [la shaqaynta dadwaynaha](#) si la isugu geeyo dadaalka wax looga qabanayo isir nacaybka: Gudigga Talo Bixinta La dagaalanka Isir Nacaybka ee Alberta ayaa kaalin muhiim ah ka ciyaaray shaqadaan.

Xaqiiqooyinka kooban

- Codsiyada waxaa la qaban doonaa ilaa 11:59 saqda dhexe habaynka Nofambar 16keeda.
- Deeqaha ayaa u furan ururadaan fadhigoodu yahay Alberta.
 - ururada khayriga ah (ka tirsan, ka diiwaan gashan ama ku shaqeeya sharciga gobalka ama kan federaalka), ayna ku jiraan ururada dadka Asalka ah, kuwa dhaqannada badan iyo kuwa diimaha
 - First Nations
 - Deegaannada Metis
- Mashruucyada u qalma waa inay lahaadaan ugu yaraan mid kamid ah hadafyada soo socda:
 - Kordhinta wacyiga isdhaafsigu dhaqannada.
 - Kordhinta fahanka dadka ree Alberta ee dadyowga ka yimid dhaqannada kale iyo farqiyada u dhexeeya.
 - Kordhinta fahanka dadka ree Alberta ee ku aadan isir nacaybka iyo caqabadaha haysta dadka Asalka ah iyo kooxaha hayb sooca loo gaysto.
 - Kordhinta aqoonta dadka reer Alberta si ay si fudud ugu aqoonsadaan waxna uga qabtaan isir nacaybka.

Xogta la xariirta

- [Deeqda dhaqannada badan iyo la dagaalanka isir nacaybka](#)
- [Qorshaha Talaabada Ka dhanka Isir Nacaybka](#)
- [Wada shaqaynta ku aadan la dagaalanka isir nacaybka](#)